

Siyaasadda Bayaanka Takoor La'aanta (Nondiscrimination Statement of Policy)

Iyada oo raacaysa shuruucda Xuquuqda Rayidka ee gobolka iyo fadaraalka, Santa Clara Valley Transportation Agency (VTA) waxay hubinaysaa inaan qofna iyada oo lagu salaynayo qoomiyadda, midabka, diinta, waddanka qofku ka soojeedo, aqoonsiga jinsiga kooxda, diinta, da'da, naafada, jinsiga, doorashada galmada, ama macluumaadka hiddo-sidaha looga saarin kaqaybqaadashada, loogu diidin dheefaha ama adeegyada, amabase loo takoorin dhammaan barnaamijyada, adeegyada ama hawlaha ay maamusho VTA.

Ogaysiiska sida uu dhigayo Xeerka Dadka Maraykanka ee Naafada ah (Notice under the Americans with Disabilities Act) Santa Clara Valley Transportation Agency

Iyada oo la raacayo shuruudaha Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah ee 1990 ("ADA"), Santa Clara Valley Transportation Agency (VTA) ku takoori mayso dadka aqoonta leh ee naafada ah naafada ay yihiin adeegyadeeda, barnaamijyada, ama hawlaha.

Shaqaalaynta: VTA kuma takoorta qofka naafada uu yahay hawlaha shaqaalaynteeda waxayna raacdaa dhammaan qaynuunada uga yaala Guddida U-Sinnaanta Shaqada Maraykanka.

Xidhiidh Waxtar leh: VTA sida qaaliibka ah, marka la codsado, waxay siin kaalmo iyo adeegyo habboon oo keenaya xidhiidh waxtar leh dadka aqoonta leh ee naafad aah si ay markaa uga qaybqaadan karaan si siman barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha, ay kujiraan tarjumaano luuqadda calaamadda oo aqoon leh, dokumentiyo ku qoran Farta Indhoolaha, iyo qaabab kale oo uga dhigaya macluumaadka iyo xidhiidhka qaar ay isticmaali karaan dadka leh dhantaalnaan hadalka, maqalka, ama aragga. \

Beddelka Siyaasadaha iyo Habraacyada: VTA waxay ku samayn doontaa dhammaan beddelada macquulka ah siyaasadaha iyo barnaamijyada si ay u hubiso in dadka naafada ah ay u helaan fursad loo siman yahay si ay ugu raaxaystaan dhammaan barnaamijyadeeda, adeegyada, iyo hawlaha. Tusaale ahaan, dadka wata xawayaanka adeega waxa lagu soo dhaweeyaa gaadiidka VTA, xarumaha gaadiidka, iyo xafiisyada maamuleed xiitaa marka rabbaayadaha sida qaaliibka ah la mamnuucay.

Cid kasta oo u baahata kaabayaal gargaar ama adeeg si ay si waxtar leh ugu xidhiidhaan, ama beddelis siyaasadaha ama habraacyada si ay uga qaybqaataan barnaamij, adeeg, ama hawl VTA, waa inay la xidhiidho:

ADA Coordinator

Office of Diversity and Inclusion

3331 North First Street, B1

San Jose, CA 95134

(408) 321-2300

www.vta.org

Fadlan ula xidhiidh Isu-duwaha ADA sida ugu dhakhsaha badan inta ayna ka soo wareegin 72 saacadood kahor dhacdada la muddeeyey.

ADA ugama baahna VTA inay qaaddo wax tallaabo ah taasi oo aasaas ahaan beddelaysa nooca barnaamijkeeda ama adeegyadeeda, ama ku soo rogaysa culays dhaqaale ama maamul oon loo baahnayn.

Dacwadaha in barnaamij, adeeg, ama hawl VTA ayna isticmaali karin dadka naafada ah waa in lagu hagaajiyo Isu-duwaha ADA (macluumaadka la-xidhiidh ee sare).

VTA saari mayso dulsaar (lacag dheeraad ah) qof gaar ah oo naafo ah ama koox dad ah oo naafo ah si ay u daboosho kharashka siinta kaabayaasha kaalmada/adeegyada ama beddello siyaasadda oo macquul ah, sida kala soo bixista shayada goobaha u furan dadwaynaha laakiin ayna isticmaali karin dadka isticmaalaya kuris-curyaanku.